

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadka 9aad

Cadad Gaar ah

03/10/2020

FAAFINTA RASMIGA AH OO
SADDEX BILOODLE AH
JULY TO SEPTEMBER 2020

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo
Not for sale*

Sannadka 2020



TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:</p> <p>1. SOOMA BIXIN</p>	
<p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER MADAXWEYNE:</p> <p>2. <u>Wareegto Madaxweyne</u> Magacaabid Xubnaha Komishanka Tamarta Korontada JSL</p> <p>3. <u>Wareegto Madaxweyne</u> Lacagaha laga helo meel ka baxsan Miisaaniyadda Qaranka</p>	2 5
<p><u>QAYBTA SADEXAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIISOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:</p> <p>4. SOOMA BIXIN</p>	
<p><u>QAYBTA AFRAAD:</u> GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:</p> <p>5. <u>Maxkamadda Sare JSL</u> Qaraar Laalis Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer LR.24/2020</p>	6
<p><u>QAYBTA SHANAAD:</u> AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:</p> <p>9. SOOMA BIXIN</p>	



QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-535/072020

Taar: 07/07/2020

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka
113 ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 5aad ee Xeerka
Tamarta Korontada
Jamhuuriyadda Somaliland,
Xeer Lr. 81/2018;

Markaan Tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay in la
dhiiri-geliyo maal-gashiga
tamarta korontada, si loo
gaadho isku fillaansho xagga
korontada ah, loona helo
koronto jaban oo kor u qaadi
karta koboca dhaqaalaha
dalka;



Markaan Dersay:

In ujeeddada Komishanka Korontada Somaliland ay tahay nidaaminta iyo kormeerka suuqa korontada, si kor loogu qaado tayada adeegga korontada, loona dhiiri-geliyo isku dheeli-tirka tartanka xorta ah oo caddaalad ku dhisan, kuna salaysan qaab-dhismeedka suuqa korontada ee uu qeexay Xeerka Tamarta Korontadu;

Markaan Arkay:

Baahida loo qabo Komishanka Maamulka Korontada Dalka, oo ka masuul noqda maamulka iyo horumarinta maal-gashiga tamarta korontada iyo xaqiijinta in farsamooyinka dhalinta korontada gudbinta korontada iyo qaybinta korontada loo fuliyo si waafaqsan Xeerarka iyo Siyaasadaha Qaranka ee tamarta, loogana hor-tago inay wax-yeelo ka soo gaadho bad-qabka nolosha iyo hantida bulshada;

Markaan Ku Qancay:

In ay Hanan karaan Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan La-tashaday:

Cidda ay Khusayso;



Waxaan Go'aamiyey;

1. In laga bilaabo taariikhda maanta aan masuuliyiintan u magacaabo in ay noqdaan Xubnaha Komishanka Tamarta Koronta Jamhuuriyadda Somaliland:

Tir	Magaca	Xilka
1	Axmed Faarax Cadarre	Guddoomiye
2	Cabdirisaaq Maxamed Cumer	Guddoomiye Ku xigeen
3	Liibaan Maxamed Axmed	Xubin
4	Yuusuf Jaamac Cali	Xubin
5	Ubax Maxamed Maxamuud Xaashi	Xubin
6	Cabdirisaaq Maxamuud Cali	Xubin
7	Khadar Cabdi Khayre	Xubin

2. In laga bilaabo taariikhda maanta aan masuulkan u magacaabo in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Komishanka Tamarta Koronta Jamhuuriyadda Somaliland:

1.	Maxamed Maxamuud Cabdi Malow	Agaasimaha Guud
----	------------------------------	-----------------

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-557/092020

Taar: 08/09/2020

Wareegto Madaxweyne

Ku: Wasaaradaha Jamhuuriyadda Somaliland

Hargeysa

Ku: Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Jamhuuriyadda Somaliland Hargeysa

UJEEDO: Lacagaha Laga Helo Meel Ka Baxsan **Miisaaniyadda Qaranka**

Sida aad la socotaan, Wasaaradaha iyo Hay'adaha kala duwan ee dalku waxa ay helaan taageero maaliyadeed oo aan ku jirin Miisaaniyadda Qaranka, taas oo ka mid noqota Kharashaadka ay ku hawl-galaan Wasaaradaha iyo Ha'adaha Dalku.

Hadaba, waxa lagama-maarmaan ah in la sugo isla-xisaabtanka iyo hufnaanta xisaabaadka Dawladda, isla markaana lagu daro diiwaanka miisaaniyadda guud ee Dalka.

Sidaa darteed, waxaa la filayaa wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda in ay dhaqaalahaas ogaysiiyaan Wasaaradda horumarinta Maaliyadda, Kana furtaa Xisaabo Lacageed (Bank Accounts) soona mariyaan taageerada dhaqaale Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland



QAYBTA AFRAAD:

GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

المحكمة العليا

Tix: MS/GMS/G-7/419/2020

Taar: 27/08/2020

KU: MADAXWEYNAHA JSL

HARGEYSA

OG: GUDDOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA JSL

HARGEYSA

OG: GUDDOOMIYAHA GOLAHA GUURTIDA JSL

HARGEYSA

OG: XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA JSL

HARGEYSA

OG: GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADA JSL

HARGEYSA

OG: DHAMAAN GUDOOMIYAYAASHA MAXK. RACFAANADA
FADHIGOODA

**UJEEDO: Gudbin Qaraar Laalis Wax-ka-bedelka iyo
Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka
Xeer LR.24/2020**

Waxan halkan idinku soo gudbinayaa Qaraar laalis wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer LR. 24/2020

Allaa Mahad leh.

Aadam X. Cali Axmed

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADA SARE JSL,

AHNA GUDDOOMIYAHA GUDIDA CADAALADA

**MAXKAMADDA SARE****MS/DD/04/2020****Taar: 27/08/2020****Ujeedo: Qaraar Laalis Xeerka Magaciisu yahay “wax ka badalka Iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr: 24/2020”**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 27/08/2020, Maxkamadda Dastuuriga ah ee J.S.L, oo ka kooban Guddida Garsoorka ee kala ah

Guddida Garsoorka

1. Aadam X. Cali Axmed	Guddoomiye
2. Maxamed Cumar Geele	Xubin
3. Cabdi Qaadir Axmed Maxamuud	Xubin
4. Axmed Diiriye Qaalib	Xubin
5. C/raxmaan Jaamac Hayaan	Xubin
6. Maxamed Faarax Siciid	Xubin
7. Cali/shucayb sh. Ibraahim Nuur	Xubin
8. C/raxmaan Xuseen Caynaan	Xubin
9. Yaxye Cali Idiris	Xubin
10.C/raxmaan Xasan Nuur	Xubin
11.C/laahi Cabdi Aadan	Xubin

oo ay Kaalinayso Sahra Ismaaciil C/laahi, waxay u fadhiisatay go'aan ka gaadhista cabashada Guddoomiyayaasha Maxkamaddaha Racfaanada Dalka J.S.L ay u soo gudbiyeen Maxkamada Dastuuriga ah ee J.S.L ee ku taariikhaysan 05/08/2020.



Nuxurkiisuna yahay “Cabasho Dabaqid kari La’aan Wax Ka Badalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr: 24/2020”

Asbaabta Qaraarka

Markay aragtay: Galdacwadeedkan sumadiisa iyo ujeedadiisu sare ku xusan yihiin.

Markay aragtay: Codsiga Guddoomiyaasha Maxkamadaha Racfaanada Dalka J.S.L ay u soo gudbiyeen Maxkamada Dastuuriga ah ee J.S.L ee ku taariikhaysan 05/08/2020

Nuxurkiisuna yahay “*CABASHO DABAQID KARI LA’AAN WAX KA BADELKA IYO KAABISTA XEERKA NIDAAMKA GARSOORKA XEER LR: 24/2020*”.

Markay Daristay: si qoto dheerna ulafa gurtay qodobada uu ka kooban yahay *Wax Ka Badalka Iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr: 24/2020* iyo nuxurka ay xanbaarsan yihiin.

Markay Aragtay: Qodobada ku jira xeerkan ee ka hor imanaya Dastuurka J.S.L oo ay ka mid yihiin

1. **qodobkiisa 6^{aad} Farqaddiisa 2^{aad}** oo u dhigan sidan “*Awoodda Garsooridda Dacwadda waxa iska leh Garsoorayaasha oo kali ah cidkalena looma wareejin karo,*



marka laga reebo ~~xafiiska~~ shareecada ee haysta ruqsad diiwaan gashan oo leh awood garsoor oo ku eeg soo saaridda go'aamo iyo caddaymo loo cuskaday shareecada islaamka” iyaddoo farqadani ka hor imanaysa qodobka 97^{aad} farqadiisa 1^{aad} ee Dastuurka J.S.L oo u dhigan sidan “waxa Qaranku yeelanayaa Waax Garsoor, oo hawsheedu tahay u gar-naqa ka dhexeeya Dawladda iyo dadka; iyo dadka dhexdooda.” Iyo qodobka 98^{aad} Farqaddiisa 1^{aad} ee Dastuurka.

J.S.L oo udhigan sidan: “Garsoorku waxa uu awood gaara ah u leeyahay:

b. In uu fasiro micnaha xeerka ka soo baxa Golayaasga Dastuuriga ah iyo xeerarka degdegg ah iyada oo laraacayo Dastuurka.

t. Inuu ka garsooro khilaafka ka dhex abuurma laamaha Dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadwaynaha oo dhinac ah ama Dadwaynaha dhexdooda.

j. In uu ka taliyo muran kasta oo la xidhiidha wafaqsaanta dustuurka.”



Iyadoo xeerkani uu awoodii waaxda garsoorka ee qaranka ee ku tilmaamnayd Dastuurka Qaranka J.S. L uu siiyay qayb ka mid ah cid kale. isagoo dastuurkuna uu si cad uu tilmaamayo awoodaha iyo shaqooyinka waaxaha kala duwan ee Qaranka J.S. Loo uu garsoorkuna ka mid yahay.

2. **Qodobka 13^{aad} farqadiisa 3^{aad}** oo u dhigan sidan:

“Dacwadaha ka baxsan farqda 1^{aad} ee Qodobkan Garsooraha waxa u banaan inuu ku go’aan qaato xukun hore oo la nooc ah dacwadan isla markaana u sababeeyo hadii dabciga dacwada aan lagu faa-faahin xeerarka dhaqan galka ah.”

Iyada oo qodobkani jidaynaayo in xukunka soo saaristiisa lagu saleeyo xukun hore Maxkamadaha uga soo baxay oo lamid ah, waana habka loo yaqaano “precedent” oo ka mid ah common law’ga , waana hab garsoor oo xeer dajin ah oo aan nidaamkeena ku jirin, waxaanuu ka hor imanayaa Qodoba 38^{aad}, farqadiisa 1^{aad} ee dastuurka J.S.L oo u dhigan sidan:

“Awoodda xeer-dejinta ee Jamhuuriyadda Somaliland



waxay gaar ku ^{tanay} Barlamaanka oo ka kooban laba Gole oo kala ah Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida. Xilka xeer-dejintu uma wareegi karo cid ka baxsan baarlamaanka.”

3. **Qodobka 28^{aad}**, oo ka hadlaya shuruudaha laga rabo Garsooraha Maxkamadda sare oo ka hor imanaya Qodobka 101^{aad} ee Dastuurka J.S.L oo sheegaya in Maxkamadda sare ee J.S.L uu nidaaminaayo xeer gaar ahi iyo sidoo kale Qodobka 105^{aad} ee Dastuurka J.S.L oo aan dhigahayn shuruudaha Qodobkan ku xusan. Isagoo sidoo kalena xeerkani ka aamusay shuruudaha Garsoorayaasha Maxkamddaha hoose.

4. **Qodobka 31^{aad} farqadiisa 4^{aad}**, oo u dhigan sidan:
“Maxkamada sare waxa ay yeelan kartaa lataliyayaal iyo khabiiro hadba intii loo baahdo oo uu magacaabistooda soo jeediyo Guddomiyaha Maxkamada sare, Guddida Cadaaladuna ansixiso”
Waxaanu ka hor imanayaa Qodobka 108^{aad} ee Dastuurka J.S.L oo ka hadlaya awoodda Guddida cadaaladda , waxaanay awoodoodu ku xadidantahay shaqo- siinta , xil-ka- qaadista , dallacaadda, hoos- u-dhigidida,



badalaadda iyo anshax –marinta
garsoorayaasha maxkamada
hoose (maxkamadaha rafcaanka,
gobollada iyo degmooyinka) iyo
ku-xigeenada xeer ilaaliyaha
Guud Garsoorayaasha
Maxkamadaha hoose iyo ku
Xigeenada Xeer ilaaliyaha Guud
oo kaliya .

5. Qodobka 35^{aad} faqradiisa 13^{aad}

oo kahadlayaa Awoodaha
Guddoomiyaha Maxkamadda
Sare ee J.S.L oo u dhigan sidan:

“Wuxuu warbixin sanadeedka
Waaxda Garsoorka u gudbiyaa
Gudidda Cadaaladda, waxa kale
oo uu sinayaa warbixinada ay ka
soo dalbadaan Gudiyadda
golayaasha xeer Dajinta u
qaabilsan arimaha garsoorka;” iyo
farqada 14^{aad} oo iyana u dhigan
sidan: *“wuxuu hormarinta
ha’yadaha garsoorka la
kaashadaa Wasiirka oo Golaha
Wasiirada ku matala ha’yadaha
bahda cadaladda;*

Waxay labadan farqadoodba
dhawacayaan madax banaanida
uu dastuurka J.S.L u siiyay
Waaxdda Garsoorka, waxaanay
ka hor imanayaan qodobka 97^{aad}
farqadiisa 2^{aad}, oo u dhigan sidan:
“2, Waaxda Garsoorku waxay
hawlaha u fulinaysaa si
Dastuurka waafaqsan, iyada oo



ka madax-bannaan waxa ayaha kale ee qaranka.” Iyo Qodobka 37^{aad} ee Dustuurka J.S.L farqadiisa 2^{aad}, oo u dhigan sidan: “2. *Dhismaha Qaranku waxa uu ka koobanyahay seddex Waxood oo kala ah: Xeer dajinta, Fulinta iyo Garsoorka. kalaxadaynta awoodaha seddexda waaxood waxay noqon doonaan sida uu Dustuurku dhigaayo. Waax waliba awoodda Dustuurku u gaar yeelay way u madax bannaan tahay.*”

Markay Aragtay:

Qodobada ku jira xeerkan ee ka hor imanaya xeerarka dhaqan galka ah ee J.S.L oo ay ka midyihiin, Xeerka Madaniga, Xeerka Habka Madaniga, Xeerka Ciqaabta Guud, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Garsoorka Caruurta, Xeerka Shaqaalaha Dawladda: waxaana ka mid ah meelaha uu xeerarkan ku khilaafayo kuwan soo socda:

1. Qodobka 17^{aad} farqadiisa 14^{aad} Xarfaha (t)(j) oo u dhigan sidan: “4. *Maxkamadda Degmadu waxay awood u leedahay, marka la eego qiimaha iyo nooca dacwada dhagaysiga dacwadaha hoos ku qoran:*

t) *Dacwadaha madaniga ah ee qiimohoogu gaadhsiisanyahay*



ilaa 30,000,000(saddex
milyan) Shilin, iyo

J) Dacwadaha ciqaabta ee
ciqaabtoodu tahay ugu
badnaan 3(seddex)sano ama
/iyo ganaax lacageed oo aan
kabadnayn 3,000,000(saddex
milyan) Shilin.”

Farqadahaani waxay ka hor
imanayaan qodobka 7^{aad} ee
Xeerka Habka Madaniga iyo
Qodobka 2^{aad} ee Xeerka Habka
Ciqaabta oo jaan gooya awoodda
Maxkamadda Degmada, ciqaab
ahaan iyo madani ahaanba,
waxaanay abuuraysaa jaahwareer
ku yimaada awoodaja garsoor
(jurisdiction)ee ay maxkamadaha
kala duwani kala lahaayeen,
arinta ugu muhiimsan ee ay
kusalaysantahay cabashada
Gudoomiyayaasha
Maxkamaddaha Racfaanada
Dalku ay tahay caqabadani.

2. Qodobada 85^{aad} oo kahadlaya
mudada rafcaanada, manuu kala
saarin mudada Rafcaanka
Xukunka iyo Mudada Rafcaanka
Qaraarka, isagoo xusay oo qudha
mudada rafcaanada xukunada oo
kaliya, inkasta oo farqadiisa 8^{aad}
si muhmal ku jirto u sheegtay in
garsoore ku xadidi karo wax
30cisho ka yar mudada Rafcaan
Qaadasho ee Qaraarada. Sidaa



darteed wuxuu khilaafsanyiinay qodobka 214^{aad} ee Xeerka Habka Ciqaabta iyo qodobka 223^{aad} ee Xeerka Habka Madniga

- 3. Qodobada 87^{aad}** wuxuu ka hor imanayaa hab raaca uu dhigaayo qodobka 248^{aad} ee Xeerka Habka Ciqaabta oo awoodda fulinta Xukunada Dilka ah maamulkeeda siinaya Maxkamadda Sare ee J.S.L halka Qodobadanina uu hormuud kadhigayo Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

Markay U Caddaatay: In xeerkani macno tiray habsami u socodkii shaqada garsoorka iyo nuxurkii eray-bixinta shuruucda uu garsoorku ku shaqeeyo. Sida “garsoore tabobare ah” ee ku xusan qodobka 67^{aad}.

Markay U Caddaatay: In xeerkani Gabi ahaanba uu meesha ka saarayo xeerarkii kale ee dhaqan galka ahaa ee uu garsoorku ku shaqaynaayay sida ku xusan qodobka 96^{aad}, oo u dhigan sidan: “ *waxaa la laalay xeer kasta iyo qodob xeer oo kasta oo xeerkan ka hor-imanaya*” waana qodob aan gabi ahaanba ladabiqi Karin , sababtoo ah waxa soo hoos galaya xeerarka uu qodobkani uu laalayo , xeerka madaniga, xeerka habka madaniga Xeerka Ciqaabta Guud



Xeerka habka Cigaabta Xeerka Garsoorka Caruurta iwm, oo qaar kood ay yihiin xeerar ka hadlaya xuquuq iyo waajibaad(substantive laws) oo anuu laali Karin xeer hab ahi (procedural law).

Markay Aragtay: In ceebaha uu Xeerkani leeyahay ay ka mid tahay in isaga oo ah wax kabadal iyo kaabis xeer hore u jiray hadana la siiyay tilmaam iyo sumad (Sanad Cusub) sidii xeer cusub laga dhigay Xeer Lr:24/2020, halkii uu ka ahaa Xeer Lr. 24/2003

Markay U Cadaatay: In xeerkani aan gabi ahaanba la dabaqi Karin Qodobada uu ka kooban yahay xeerku isagoo abuuray jaha-wareer ku yimid habsami u socodkii shaqada garsoorka.

Markay Aragtay: Qodobka 97, 98 ee Dustuurka Qaranka J.S.L.

Markay Daristay: Dhamaan asbaabtaa sare ku waxay soo saartay qaraarkan soo socda:

Qaraarka Maxkamadda

Maxkamadda Dastuuriga ah ee J.S.L:

1. Waxay aqbashay Codsiga Gudoomiyayaasha Maxkamadaha Rafcaanda Dalka J.S.L ay u soo



gudbiyeen Maxkamadda Dastuuriga ah J.S.L ee ku taarikhaysan 05/08/2020.

2. Waxa ay laashay gabi ahaanba Wax kabadalka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xer Lr 24/2020 Maadama oo uu ka hor yimi Dastuurka J.S.L iyo xeerarkii kale ee dalka J.S.L
3. Waxa dhaqan gal ah xeerkaa hore ee nidaamka garsoorka J.S.L ee hore loogu dhaqmi jiray ilaa inta uu badalayo xeer kale oo dustuurka J.S.L Waafaqsan.
4. Qaraarkani waxa uu soo baxay maanta oo ay taarikhdu tahay 27/08/2020.

Guddida Garsoorka:

1. Adam X. Cali Axmed Guddoomiye: _____
2. Maxamed Cumer Geelle Xubin: _____
3. C/qaadir Axmed Maxamuud Xubin: _____
4. Axmed Diiriye Qaalib Xubin: _____
5. C/raxmaan Jaamac Hayaan Xubin: _____
6. Maxamed Faarax Siciid Xubin: _____
7. Cali-shucayb Sh. Ibraahim Nuur Xubin: _____
8. C/raxmaan Xuseen Caynaan Xubin: _____
9. Yaxye Cali Idiris Xubin: _____
10. C/laahi Cabdi Aadan Xubin: _____
11. C/raxmaan Xasan Nuur Xubin: _____

((Sahra Ismaaciil Cabdilaahi))

Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL

=Hargaysa=